



Ref:SEA/065/

WAR-SAXAAFDEED

10/5/2025

## KAALINTA URURKA INJINEERADA SOOMAALIYEED EE KA JAWAABISTA ROOBABKA XOOGGAN

Ururka Injineerada Soomaaliyeed (Somali Engineers Association) wuxuu si qoto dheer uga tacsiiyeynaya qoysaska ay saameeyeen roobabkii xooganaa ee da'ay xalay, kuwaas oo sababay burburka guryo badan iyo go'itaanka wadooyin muhiim ah oo ku yaalla magaalada Muqdisho iyo nawaaxigeeda.

Xaaladdan degdegga ah awgeed, Ururka wuxuu si degdeg ah u shaacinayaa in uu diyaar u yahay inuu door muuqda ka qaato

**1. Qiimeyn Xirfadeed:** Injineerada xubnaha ka ah ururka ayaa diyaarinaya kormeer degdeg ah oo lagu ogaanayo heerka burburka guryaha iyo wadooyinka si loo helo xog sugan oo lagu saleyn karo jawaab celinta hay'adaha dowliga iyo kuwa samafalka.

**2. Talo-bixin Farsamo:** Waxaa diyaarsan injineero bixin kara talooyin dhismo oo xirfadeed oo ku saabsan xoojinta guryaha, maaraynta biyaha roobka, iyo dhismaha wadooyin u adkeysan kara xaaladaha cimilada adag.

**3. Wacyigelin iyo Tababar:** Ururku wuxuu bilaabi doonaa barnaamijyo tababar iyo wacyigelin ah oo bulshada iyo farsamayaqaannada looga wacyigelinayo muhiimadda ay leedahay dhismo badbaado leh iyo ka hortagga daadadka.

**4. La Shaqeyn Dawladeed:** Waxaan diyaar u nahay inaan si dhaw ula shaqeyno Wasaaradda Howlaha Guud, Dawladaha Hoose, iyo hay'adaha la xiriira si loo sameeyo qorshe waara oo wax looga qabanayo saameynta cimilada iyo dhismaha kaabayaasha adkaysiga leh.

Waxaan ugu baaqeynaa dhammaan hay'adaha dowladda, bulshada rayidka, iyo beesha caalamka in la iska kaashado samatabbixinta, dib-u-dhiska iyo horumarinta adeegyada kaabayaasha si loo yareeyo khasaaraha noocan oo kale ah mustaqbalka.

-DHAMAAD-

Eng. Ibrahim Abdi Haile  
Guddoomiyaha Ururka Injineerada Soomaaliyeed



+252-771706721  
+252-683719724



www.somaliaengineers.so  
@infosomaliaengineers.so



Flour 2, Osman Ahmed Roble Building,  
Makka Al Mukarama Road, Howld Wadag District  
Mogadishu, Somalia.